

Refugee agencies help and advice



November 2008

Somali

Ma tahay dhibane dhibis sinji?

Haddii lagu weeraray, lagu cabsi galiyay, ama lagu caayay sababta oo ah midabkaaga, sinjigaaga, qowmiyaddaada ama asalkaaga wadan, waxa aad tahay dhibane dhibis sinji. Dhibis sinji waa dambi culus waxana uu yeelan karaa qaabab kale duwan, sida:

- Hadal:** weedho, faallooyin, ama kaftan cay ah ama hanjabaad;
Cay ama dhaarasho;
- Xumeyn:** Wicitaano teleefon ama waraaqo ah xumeyn ama edeb-daro;
Dibadda gurigaaga oo lagu qubo qashin ama sanduuqaaga waraaqaha;
Sameyn sanqadh joogto ah;
- Budhcadnimo jidheed:** waxyeelo jidhka ah oo dhab ah am hanjabaad waxyeeyn;
Gurigaaga ama maalkaaga oo waxyeelo loo geysto, tusaale ahaan
daaquadaha ama albaabada oo la jabiyo;
- Qoraal darbi oo cunsuri ah:** Xumeyn la qoray ama la sawiray.

Dhibis sinji waa sharci-daro. Dadka ku kaca waxyaabaha oo kale waxa laga dacweyn karaa maxkamadaha. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay inuu noolaado isaga oo aan ka baqayn weerar lagu soo qaado naftiisa, gurigiisa ama maalkiisa. Maamulada sida boliiska, goleyaasha degmooyinka iyo dugsiyada waxa ku waajib ah inay adiga iyo qoyskaaga ka badbaadiyaan dhibista sinji iyo inay talaabooyin ka qaadaan weerareyaasha. Dadka weerara dadka kale sababta oo ah midab, sinji, qowmiyad ama asal wadan waxa laga saari karaa guryahooda, waana la ganaaxi karaa ama waa la xidhi karaa.

Maxaa aad sameyn kartaa?

Haddii lagu weeraro waa inaad isla markiiba la xidhiidhid boliiska. Waxa aad tagi kartaa rugta boliiska ee kuugu dhow ama waxa aad wici kartaa 999 – u sheeg boliiska in weerarka lagugu soo qaaday ahaa mid ku saleysnaa sinji. Haddii aanad rabin inaad dhacdada si toos ah adigu ugu sheegin boliiska, waxa jira ururo badan oo kaa gargaari kara inaad la hadashid boliiska. Si qarsoodi ah ayaad ugala hadli kartaa dhacdada mana qaadi doonaan wax talaabo ah haddii aanad raali ka ahayn. Ururadaa waxa ka mid ah Goob Adeeg (One Stop Service), Golaha Sinaanta Sinjiga (Racial Equality Council), Xafiiska La-talinta Muwaadiniinta (Citizens Advice Bureau), xarun sharci, xarun beeled ama urur qaxooti. Maadaama ay dhibistu dambi tahay, waa inaad sidoo kale dhacdada u sheegtid maamulka gurigaaga. Ururada guryaha iyo ururada kale ee aan faa'iido-doonka ahayn ee guri siiya dadka baahan iyo waliba goleyaasha degmooyinka waxa waajib sharci ka saaran inay kaa badbaadiyaan dhibista.

Waa inaad qortid wakhtiyada, taariikhaha dhacdooyinka iyo faahfaahin sax ah oo ku saabsan waxa dhacay. Taasi waxay kaa gargaari doontaa inaad si sax ah u xusuusatid waxa dhacay iyo goorta uu dhacay waxana ay taasi qofka ku gargaaraya u muujin doonta sida dhibku u culus yahay.

Qoraalo kale waxa laga heli karaa <http://languages.refugeecouncil.org.uk>

Asylum Support Partnership is a partnership project hosted by the British Refugee Council
British Refugee Council, (commonly called the Refugee Council) is a company limited by guarantee registered in England and Wales, [No 2727514] and a registered charity, [No 1014576].
Registered office: 240-250 Ferndale Road, London SW9 8BB, United Kingdom



Sidee baa lagu gargaari karaa?

Waxa jira talaabooyin waxqabad ah oo golaha degmada iyo boliiska ay tahay inay qaadaan si looga hortago dhibista oo loo taageero dhibaneyaasha dhibis sinji. Waxay awoodaan:

- Inay gartaan kuwa lagu tuhunsan yahay dhibista oo ay qaadaan talaabo sharci oo haboon;
- Inay ku taliyaan in mulkiileyaasha guryuhu sameeyaan waxqabad sugid ammaan oo dheeraad ah;
- Inay wargaliyaan waaxda waxbarashada ama dugsiga haddii ilmo la cabsi galiyo;
- Inay kuu gudbiyaan ururo kale oo bixin kara taageero iyo la-talin dheeraad ah.

La-xidhiidhista Taageerada Dhibanaha (Victim Support)

Haddii aad u maleynaysid inaad tahay dhibane dambi ama dhacdo censuriyad ama takooris ah, waxa aad la xidhiidhi kartaa Taageerada Dhibanaha, oo ah hay'ad samo-fal oo ah heer qaran oo loogu talagalay dhibaneyaasha dambi. Hay'adda Taageerada Dhibanuhu waxay bixisaa taageero niyadeed, war iyo gargaar waxqabad ah. Haddii loo baahdo, waxay kuula xidhiidhi karaan ururada kale, sida boliiska iyo maamulada guryaha. Waxa aad la xidhiidhi kartaa Taageerada Dhibanaha adiga oo wacaya 0845 3030 900. Haddii aanad ku hadlin Ingiriisi, waxa lagu soo diyaarin karaa turjubaan. Waxa loo baahan doonaa inaad sheegtid luqaddaada oo aad bixisid lambarka teleefonkaaga ka dibna la-taliye wata turjubaan ayaa dib kuu soo wici doonaa.

Xusuuso, mid kasta oo ka mid ah ururada kor lagu sheegay ayaa bixin kara talo. Laybareeriga degmadaada iyo buugga teleefonka ayaa laga heli karaa faahfaahinta sida loola xidhiidhi karo.

Asylum Support Partnership consists of:

Migrant Helpline, charity number: 1088631 www.migranthepline.org.uk
Refugee Action, charity number: 283660 www.refugee-action.org.uk
Refugee Council, charity number: 1014576 www.refugeecouncil.org.uk
Scottish Refugee Council, charity number: SC008639 www.scottishrefugeecouncil.org.uk
Welsh Refugee Council, charity number: 1102449 www.welshrefugeecouncil.org